JAMHUURIYADDA DIMUQORAADIGA SOOMAALIDA
WASAARADDA WAXBARASHADDA IYO BARBAARINTA

# SHEEKOOYIN LAYSKU SOO URURSHAY

Qore
*Maxamuud Maxamed Cilmi*

# DHURUQ IYO DAYO


Qore

Maxamuud Maxamed Cilmi


Muqdisho 1979

# DHURUQ IYO DAYO

Beri aad u fog waxa saaxiib ahaa Dhurwaa iyo Dawaco. Dhurwaaga waxa la odhan jirey, Dhuruq, Dawacadana Dayo. Meel bay ku wada noolaayeen. Berigaas, Habar-dugaaggu wuxuu dhisan jirey aqallo sida bini-aadmiga oo kale. Dhuruq wuxuu lahaa cariish aad u fiican oo lahaa albaab iyo daaqad, Dayona waxay lahayd waab xun oo meel walba ka daldaloollay.



Dayo iyo Dhuruq waxay ku wacatameen in midba waxa uu soo helo ka kale wax ka siiyo. Dayo way ka si yaasad iyo xeeladba badneyd Dhuruq oo iyadu wixii ay hesho way ka qarsan jirtey, hase yeeshee, Dhuruq waxba kama qarsan jirin ee wixii uu soo helaba wuu keeni jirey oo ay wada cuni jireen.






Maalintii dambe ayuu Roob meel kasta ka soo curtay. Onkod yeedhaya iyo hillaac bililigleynaaya ayaa arligii asqeysiiyey. Dabadeed, Dayo ayaa welwel iyo walaac galay, waayo waxay ogeyd in uusan waabkeeda xuni ka celinahayn roobka. Ka bacdi, waxay ku kacday sidii ay Dhuruq uga khiyaameysan lahayd cariishkiisa fiican.






Dayo ayaa Dhuruq u tagtay oo ku tidhi, «Waar Dhuruqow, meel walba roob ayaa iska soo qabsaday. Waana adiga og in cadowgeennu badan yahay. Ha dhow markii uu roobku yimaado ee cadowgu kadinka isa soo taago, xaggee baad ka bixi illeyn cariishkaagu ma laha meel kale oo aad ka bixi karto e? Aniga marka layskay soo hortaago, meel kasta waa ii bannaan tahay oo waan ka bixi karayaa!»






Dhuruq ayaa rumeystay hadalkaas Dayo, markaasuu naxay oo baqay oo yidhi, «Dayooy waa runtaa ee meel aan ka bixi karaa ma jirto. Naa eedooy ii beddel gurigaaga caawa. Adiga ayaa yar oo ka bixi karaaya dariishadda cariishkayga e».

Dayo ayaa ugu jawaabtay, «Weger! Weger! Waar maya, maya. Ma aniga ayaad i dileysaa, Dhuruqow?».




Dhuruq ayaa dabadeed baryey Dayo oo yidhi, «Naa eedooy, haddii aynnu saaxiib nahay cadowga ha ii jebinin e ii beddel guriga».

Dayo oo caloosha ka faraxsan ayaa aqbashay baryadaas Dhuruq oo tidhi, «Bal waa hagaag, Dhuruqow, aniga ayaa Ilaah ku hadhaya oo naftayda biimeynaya e».





Dayo ayaa sidaas ku khiyaameysay Dhuruq oo waabkeedii u beddeshay.



Dayo oo ku jirta cariishkii Dhuruq iyo Dhuruq oo ku jira waabkii Dayo, ayaa Roobkii yimid fiidkii.





Waabka Dayo ma celinahayn dhibicda roobka sidaas daraadeed, Dhuruq markiiba waa wada qoyey. Dhowr jeer ayuu marba meel ka booday waabkii oo roobkii oo da'aaya dhexqaaday, waayo onkodkii iyo hillaacii aan kala joogsanahayn buu mooday colkii ay Dayo sheegaysey. Markii uu arkay in aaney cidina eryanahayn ayuu kolba ku soo laabanaayey waabka Dayose inta ay albaabkii hoosta ka xidhatay ayey hurdo madaxa iyo mijaha martay.




Roobkii ayaa qaadi waayey. Dhuruqna waa u adkaysan kari waayey qabawgii iyo dhaxantii roobka, markaasuu qadhqadhyo jidhku wada gariiray. Albaabkii ayuu Dayo ku tumay: «Naa Dayooy, naa albaabka naga fur». Dayona inta ay is-nabto ayey ogaan u dhegeysataa.






Waxay habeenkii oo dhan ogaan u dhegeysataba, markii waagu soo beryaayey ayey Dayo albaabkii ka furtay Dhuruq, isaga oo dhaxan gawsaha isla dhacaaya, biyona meel walba ka da'ayaan. Markiiba wuxu weydiiyey, «Naa haddii aan xalay oo dhan kugu garaacaayey albaabka, maxaad iiga furi weydey?».



Dayo ayaa Dhuruq ugu jawaabtay, «Alla hoogyey! Albaabku waa furnaaye maxaad u soo riixi weydey? Maxaad Dhuruqow sidaas iigula hadlaysaa? Anna waxaan ku xabeebsaday sidii aan xalay oo dhan kuugu yeedhayey ee aan u lahaa: Waar Dhuruqoow! Waar Dhuruqow roobka ka soo gal, ee xaggaad jirtey?» Ka bacdina waxay u shidday dab uu kulaalo, iskuna qallajiyo.







Markii uu diiray ee ay dhaxantii ka ba'day Dhuruq ayey Dayo ku tidhi, «Alla Dhuruqow gaajo weynaa! Waan diidayaa! Waar bal ina keen aan meskaraddii qabano e waa intaasoo aynnu wax ka helnaa e».

«Waa hagaag ee ina wadi», Dhuruq ayaa ugu jawaabay.

Dabadeed, waa laysa soo raacay.



Dhuruq iyo Dayo oo ku soo socda meskaraddii ayaa helay adhi meel ku xareysan oo aan cidi la joogin.





Dayo ayaa Dhuruq ku tidhi, «Waar Dhuruqow illeyn anigu xoog aan wax ku qaado ma lihi e, adigu u dhac oo inta aad xusho wanka ugu weyn ee ugu shilis inoo soo qaad. Aniguna waxaan isu kaa taagayaa kadinka oo haddii aan dad arko aniga ayaa ku qaylinaya».

Dhuruq ayaa u dhacay xeradii.




Asagoo Dhuruq ku dhex-jira adhigii oo ka xulaaya neefka ugu weyn, Dayona ay kadinka taagan tahay, ayaa raggii adhiga lahaa ka soo noqday suuqii oo arkay dawacada hortaagan xeradii; markaasey ku soo carareen.





Dayo ayaa aragtay ragga ku soo cararaya, markaasey baxsatay iyada oon u qaylin Dhuruq oo weli adhigii ku dhex-jira.




Dhuruq oo markaas wan weyn tuurta saaray ayaa raggii iska soo taagay irriddii.






Markii uu raggii ku qayliyey «Yur ... Yur ... Yur... , ayuu Dhuruq inta uu wankii dhulka ku tuuray isku soo qaaday raggii oo kadinka taagan, markaasuu ka dhexdusay.




Dhuruq oo sii cararaya ayuu nin budh ka daba tuuray oo kaga dhuftay lug dambe.





Dhuruq oo lug dambe ka dhitinaaya ayaa soo gaadhay Dayo oo weydiiyey, «Naa maxaad iigu qaylin weydey markii aad ragga aragtay?»

Dayo ayaa ugu jawaabtay, «Waar naga tag! Haddii aad dhego beeshay ma aniga ayaa kuu sameynaaya kuwo cusub. Labadaydii dhegood baa igu dillaacay sidii aan sare kuugu qaylinayey. Waar Dhuruqow! Waar waa rag eh soo carar! Illeyn adigu waxba ma maqashid haddii aad mashquul tahay!».



Markii ay guryahoodii ku soo noqdeen ayey lugtii aad u barartay oo u kaartay Dhuruq. markaasuu soconba kari waayey.



Maalintii xigteyba. lugtii aad bey u korboqday Dhuruq. toddobaad markii ay bukteyna waxay noqotay naafo oo way yaraatay.





Maalin maalmaha ka mid ah ayey Dayo ka dhuumatay Dhuruq. markaasey ka cuntay neef baraar ah reer u dhowaa. Neefkaas badhna way cuntay. badhkii kalena waxay ku xaseysatay meel. Markiibana waxay ku soo noqotay Dhuruq oo aan weli tebin maqnaashadeedii.



Raggii reerka ayaa helay raqdii neefkii ay Dayo cuntay iyo badhkii ay qarsatayba.





Dabadeed, raggii ayaa Dayo dabin ugu xidhay badhkii neefka. Dabinkaasi wuxuu ahaa mid shabaq ah (shebeg).




Maalintii xigtey, inta ay Dhuruq iska qarisay, ayey Dayo soo jarmaadday oo doonatay badhkii neefka ee ay meesha ku qarsatay.






Dayo ayaa is-tidhi hilibkii cun markaasey gashay dabinkii. Waana u suurogeli weydey in ay ka baxdo dabinkaas.




Dhuruq ayaa tebey maqnaashihii Dayo, markaasuu soo raadiyey illaa uu ugu dul-yimid iyadoo dabin shebeg ah ku dhex-jirta. Markaasuu weydiiyey, «Naa yaa Dayo, maxaa kugu dhacay?»

Dayo ayaa ugu jawaabtay, «Reer abtigay ayaa i martiqaaday maanta. Waa adiga arka gurigan xariirta ah ee ay i geliyeen iyo hilibkan ay ii keeneen. Imminkana hilib kale ayey ii keenayaan ee aad wax ka cuntid e ila soo gal gurigan».










Dhuruq oo leh «oo xaggee baan ka soo galaa», ayaa maqlay dad soo qaylinaaya. Markaasuu fiiriyey oo arkay dad soo yaacaya oo middiyo iyo huudho soo sita.







Dabadeed, Dhuruq ayaa gartay siyaasaddii iyo khiyaamaddii Dayo oo yidhi, «Horta Dayo wax badan baad i sirtay oo aad i shirqooshay, hase yeeshee, ay daacadnimadaydu iga badbaadisay. Waxa la yidhi «ma hungowdo daacadi». Maantana waa taa wacad Alla ku qabtay ee nabadgelyo, sir ma qabe Allaa u sahan ah». Ka bacdi wuu ka cararay. Halkaas baana lagu dilay Dayo.





# INANTII EEYADDA AHAYD

# IYO

# SHEEKOOYIN KALE

Muqdisho 1979

## INANTII EEYADDA AHAYD

Beri waxa jirey islaan da' ahayd oo aan weligeed dhalin, waxaana la odhan jirey Xaabeeya. Xaabeeyi waxay had iyo jeer Ilaah ka baryi jirtey in uu ubad siiyo. Mar kasta oo ay salaad tukataba; waxay si quus ah ugu ducaysan jirtey, «Ilaahayow maan waxuun dhalo». Ilaa labaatan wadaad ayey u tagtay oo mid walba qardhaas ka soo qaadatay, sidaas daraaddeed, Xaabeeya waxaa meel walba ka lullan jirey qardhaasahaas oo qof aan aqoonin wuxuu moodi jirey in ay waalan tahay.

Maalintii dambe ayey Xaabeeyi uureysatay. Markaasay iyada, odeygeedii iyo dadkiiba aad ugu farxeen oo waxay sameeyeen xaflad lagu maamuusay uureysigeedaas. Duqa qabay oo la odhan jirey Guuleed Hawle ayaa si kaftan ah ugu yidhi, «Naa Xaabeeyaayey, dumarka da'daada ihi ma dhalaan e ma laga yaabaa waxa aynnu uurka moodaynaa in ay tahay dacar ku dhaamisay!». Xaabeeya ayaa xanaaqday oo si cadho ah u tidhi, «Horta Guuleedow xaasid baa tahay. Waar miyaan kaa da' weynahay, sow adiga i yaqaan ee aad i daadihin jirey anigoo carruur ah? Miyaanse weli gaadhay da' dhalmoreys? Labaatan jir baan ahay ee ma waxaad igu ar kaysaa darxumada iyo xanuunka».

Guuleed Hawle baa qosol u dhacay oo yidhi, «Haddii aad beri ahayd inan yar oo carruur ah sow maanta maad gaboobin, ma weli inantii baad tahay? Imisa sano ayaa ka dambeysey markaan ku daadahin jirey? Waa afartan iyo shan sano! Bal wejigaaga duuduubmay fiiri, ma araggaasaad labaatan jir ku sheeganaysaa? Midda kale, goormaad bukootay amase darxumootay, in dhoweyto oo habro juucjuuc ku hayey mooyaanee!».

Xaabeeya ayaa dabadeed ooyday. Run ahaantii kama aysan ooyin hadalkaas Guuleed ee waxay xasuusatay sidii ay beri ahayd iyo quruxdeedii dhallinyaranimo. Waxay xasuusatay iyadoo toban iyo lix jir ah, muggeed u buuxda oo aad quruxda yaabtid wejiga, dhabannada, sanka, suunivaha, bishmaha, timaha, dhexda, kubabka, iwm oo ninkii arkaaba ka dabadhaco; iyo imminkoo ay markay muraayad isku fiiriso aad wejiga moodid in qolofi ka saaran tahay.

Markii uu Guuleed Hawle arkay Xaabeeya oo nu rugeysan ayuu maslaxay oo xasuusiyey berigii ay is-arooseen oo yidhi, «Ma xasuusan tahay Xaabeeyaay, maalintii aynnu isguursanay ee boqolka iyo kontonka faras laynoogu soo dabbaaldegay. Ma xasuusan tahay boqolkii halaad, qorigii Maandhiin yaraha ahaa iyo tiradii adhiga ahayd ee aan Aabbahaa maalintaas yaradka u siiyey. Ma xasuusan tahay ciyaartii ka dhacday gurigeenna hortiisa toddobaadkii aynnu arooska ahayn!».

Xaabeeya ayaa mar qudha fadhigii ka soo booddey sidii ay hurdo ka soo hambaabertay oo tidhi, «Haa ... haa oo Guuleedow, beri dhoweyd ayaan soo maray gurigii aynnu isku aroosnay oo waxaan arkay geedkii weynaa ee guriga u dhowaa oo weli sidiisii ah oo aan waxba iska beddelin».

Halkaas bay ku illowday Xaabeeyi cadhadii oo iyada iyo Guuleedba ka sheekaysteen sheekooyinkoodii iyo noloshoodii berigii hore.

Maalintii dambe ayey Xaabeeyi foolatay, waxaanay dhashay Eeyad yar oo inan ah. Dadkii oo dhan baa yaabay. Dadka qaarkii waxay soo jeediyeen in la dilo ama nolol lagu aaso Eeyaddaas yar, hase ahaatee, waxa ra'yigaas diiday Xaabeeya oo iyadu tidhi, «Inkastoo ay dushay



uga eg tahay Eeyad haddana waa ilmo Ilaahay i siiyey oo aniga ayaa dhalay. Miyuu qofna jecel yahay in carruurtiisa la yidhaado ha la dilo? Waa maya! Haddaba, iiga taga ilmahayga».

Ayaamo ka bacdi ayuu Guuleed Hawle ku geeriyooday shil baabuur; waxaana isku soo hadhay Xaabeeya oo weli umul ah iyo Eeyaddeedii yarayd.

Xaabeeyi waxay Eeyaddeeda ula macaamili jirtey sidii bani-aadmiga oo kale. Sariirta ayey ku wada seexan jireen, isku weel bey cuntada ku wada cuni jireen; meel kastana way isu raaci jireen. Aakhirkiina, markii ay kortay, Eeyadda yari waxay yeelatay dabeecadda dadka oo kale, hase yeeshee, waaney hadli kari jirin uun. Marka ay is-tidhaahdo hadal waxay odhan jirtey: wah... wah... sida Eeyga oo kale.

Eeyaddaas yari waxay ahayd mid garasho badnayd oo wax walba fahmi jirtey, sidaas daraaddeed, ayey hooyadeed ugu bixisay SHAN-KA-ROON. Shankaroon waxay noqotay fariid ku-dayata hablaha la khayrka ah, waxaaney wax walba la jeclayd hooyadeed Xaabeeya. Waxay jeclayd in ay hooyadeed alaabta uga soo gaddo suuqa, xaabada uga soo gurto kaymaha, hase yeeshee, Xaabeeya ayaa ku odhan jirtey, «Shankaroon, ma waxaad is-moodeysaa inaad inan tahay? Ha ku-dayanin hablaha bini-aadmiga ah». Sidii ay hadalkaas hooyadeed fahamtay oo kale ayey Shankaroon gorodda hoos u laalaadin jirtey oo ciyi jirtey.

Marka ay hablaha magaaladu galabtii xaabada u doonaan kaynta, ayey Shankaroon, inta ay xadhig qaadato, ka daba-carari jirtey. Run ahaantii, hablo wanaagdato, ka daba-carari jirtey. Run ahaantii, hablo wanaagsan bay ahaayeen oo aad bay ugu naxariisan jireen Eeyadda yar oo ayagaaba xaabada u xidhxidhi jirey oo dusha u saari jirey.

Waxa jirey Balli weyn oo ka yara fogaa magaalada, una dhowaa guriga Boqorka. Marka habluhu soo guraan xaabada ayey balligaas iman jireen oo ku dabbaalan jireen. Mid waliba inta ay dharka iska wada bixiso, ayey iyada oo qaawan ku dabbaalan jirtey. Hase yeeshee. Shankaroon waxay tegi jirtey meel ka fog hablaha oo aaney ka arki karin.

Maalintii dambe, isagoo fadhiya oo ku naacawsanaya berendhaha dabaqada saddexaad, ayuu inan ina Boqorihi arkay hablahaas ku dabbaalaneyev balligaas. Inankaasi wuxuu ahaa guurdoon, markii uu arkay hablahaas qaaqaawan ee balliga ku dhex-jirana, aad buu ugu fiirsaday si uu u eego ta ugu quruxda badan ee oori u noqon karta. Sidaas ayuu indhaha ula raacay oo mid mid ugu fiirsaday. Markii dambe, waxay indhahiisu qabteen gabadh aad u qurux badan oo iyadu meel gooniya keligeed ku dabbaalaneysa.

Wuxuu garty in aysan gabadhaasi ka mid ahayn gabdhaha magaalada joogay, waayo hore ayuu dhammaantood u wada arkay. Haddaba, wuxuu daawado gabadhaasba, markii dambe ayuu arkay iyadoo ka soo baxday biyihii oo inta ay wax gashatay noqotay Eeyad. Dabadeed, waxay ku darsantay hablihii kale oo iyagu lebisan dharkoodii.

Inankii baa inta uu si degdeg ah u gashaday dharkiisii fuulay faraskiisii oo soo gaadhay hablihii iyo Eeyaddii. Inankiibaa aad ugu fiirsaday Eeyaddii yarayd, markaasuu arkay in ay dhan kastaba ka tahay Eey. Isagoo yaaban ayuu hablihii weydiiyey meesha ay Eeyadda yari ku nooshahay iyo cidda leh. Markii loo sheegay qisadeedii, ayuu dib ugu laabtay gurigiisii. Wuxuu ka fekerayey habeenkii oo dhan gabadhii quruxda badneyd ee markii dambe isu-rogtay Eeyadda.



Markii uu waagii beryey, ayuu inankii aabbihii u tegey oo ku yidhi. «Aabbe, waa adigii wax badan igula taliyey inaan guursado gabadha aan anigu doorto. Haddaba, shalay galab ayaan arkay gabadhii aan guursan lahaa».

Boqorkii baa ugu jawaabay. «Waa yahay e tumaad soo arkootay?»

Inankii baa yidhi. «waxa weeye Eeyadda ay dhashay islaanta Xaabeeyi».

Boqorkii baa naxay oo fajacay oo yidhi. «Ma Eeyad baad rabtaa inaad guursato? Aabbe, miyaad waalatay? Maxaad caynkaas igula hadlaysaa? Maxaad magacayga iyo magaca weyn ee boqortooyada u kharibaysaa? Sidee baad tahay inankaygiiyow? Waar yaannu dadku ina maqlin e bal aamus!»

Inankiibaa ugu jawaabay. «Aabbe, anigu ma waalli ee boqolkiiba boqol ayaan miyir qabaa. Waxaas aynnu Eeyadda moodaynaa maaha Eeyad ee waa gabadh cid la qurux ihi dunida ku noolayn. Aniga ayaana idin tusi doona marka aan guursado».

Boqorkii bay cadho karaarta kaga dhegtay. «Sidee baad nooga dhaadhicineysaa in Eeyeddaasi tahay gabadh? Ma waxaannu kaa maqalnaa in Eeyaddaasi tahay gabadh qurux badan? Ha ina ceebeyn, Aabbe. Gabadhii kale ee aad soo arkooto ii soo sheeg, wax kastana i weydii».

Inankii baa ku adkaystay. «Anigu waxaan rabaa Eeyaddaas. Haddii lay guurin waayana, xiniinyaha ayaan iska goynayaa!».

Boqorkii bay talo ku caddaatay. Run ahaantii, Boqorku aad buu u jeclaa inankiisa, waxaannu aqbali jirey wax kasta oo uu ka calmado ama weydiistaba. Sidaas daraadeed, waa in uu maantana u aqbalaa qadiyadan

adag ee uu ula yimid, waayo haddii kale waxay kala dhimanayaan inankiisa uu adduunyada u jeclaa.

Aakhirkii ayuu Boqorkii, isagoo aad uga xun, u oggolaaday in uu inankiisu guursado Eeyaddaas yar.

Xaabeeya ayaa loo tegey oo la weydiistay Eeyaddii yarayd. Iyadoo yaaban ayey markiiba bixisay. Isla markaasba, waxa Xaabeeya la siiyey yarad lahaa mood iyo noolba.

Eeyaddii Shankaroon baa la aroosay, iyadoo dadkii oo dhani ka fajacsanaa oo garan la'aa ujeeddada uu ina Boqor ka lahaa guursiga Eeyadda. Inkastoo dadku ra'yigaas qabay, haddana si fiican baa arooskii looga ciyaaray oo looga dabbaaldegey.

Habeenkii markii loo kala tegey, ayey inankii iyo Eeyaddii ku wada jiifsadeen sariirtii oo midba dhinac ayuu isduuduubay. Inankii habeenkii oo dhan waa soo jeeday, mar kastana wuxuu fiirinaayey Shankaroon. Markii waagii beryey ayey Shankaroon kacday oo musqusha aaday. Inankuna waa la socday kicintaankeedaas. Markii ay gashay ayuu isna inta uu sanqadhtirtay meel yar oo daloosha ka fiiriyey. Alla! Wuxuu arkay iyadoo iska bixisay haraggii Eeyga oo ku maydhaneysa tuushkii. Albaabkii oo uu moodayey in uu furan yahay ayuu aad u riixay oo isyidhi gal, hase yeeshee, nasiibdarro hoosta ayey sow ka xidhatay! Sariirtii ayuu ku laabtay oo inta uu isduuduubay iska dhigay sidii qof aan toosinba. Muddo yar ka bacdi ayey Shankaroon ka soo baxday musqushii oo sariirtii haddana barbar kaga fariisatay.

Maalintii oo dhan ayuu inankii ka fekeraayey sidii uu u qaban lahaa Shankaroon marka ay haragga Eyga iska bixiso. Wuxuu arkay in marka qudha ee uu qaban



karaa tahay marka ay ku jirto musqusha ee ay qubeysaneyso. Wuu fekeray oo aakhirkii wuxuu kharaabiyey khasnaddii albaabka musqusha; kaasoo uu ka dhigay mid iska furma marka xoog loo juggeeyaba.

Haddaba, subaxii dambe markii ay gashay musqusha ee uu hubsaday inay haraggii iska bixisay ayuu mar qudha duqeeyey albaabkii oo muddo ku siman ilbidhiq ugu galay iyadoo qaawan. Wuu isku duubay oo ka tuuray haraggii, isla markiina huwiyey go' uu u soo diyaarsaday. Ka bacdi, inta uu ayadii ku xidhay qolkii hurdada ayuu haraggii gubay.

Dabadeed, isla subaxaasba, inankii baa inta uu dhar u geshay Shankaroon, u yeedhay Aabbihii oo ku yidhi, isagoo gacanta haysta, «Waa tan gabadhii aad ii diideyseen!» Boqorkii baa la yaabay quruxdeedii oo u qaadan waayey markii hore oo dhan, hase yeeshee, markii uu inankii uga sheekeeyey arrintii ayuu garawsaday.

Isla maalintiiba, Boqorkii wuxuu sameeyey xaflad weyn oo lagu xusaayey isbeddelka Shankaroon oo dadkii oo dhani ka soo qaybgalay. Aad baa loogu riyaaqay, looguna badhbadhaadhay inantaas Eeyadda la moodayey, hase ahaatee, sida dhabta ah ahayd inan laga sawaabay indhaha bini-aadmiga.

Waxa isna jirey wiil kale oo Boqorku dhalay, kaasoo asna weydiistay aabbihii in uu u oggolaado in uu guursado gabadhii uu la dhaco. Wiilkaas waxa la odhan jirey Guhaad. Markii uu Boqorku u oggolaaday ka dib ayaa wuxuu arkay Eyad aad u quruxsan oo guri hortii kadaloobta. Sidii walaalkii oo kale ayuu asna Aabbihii ka codsaday in uu u guuriyo Eeyaddaas, haddii kale wuxuu ku dhaartay in uu is-dili doono. Boqorkii bay haddana talo mar labaad ku caddaatay. Aakhirkiina waxay ku keliftay

in uu Guhaad la u guuriyo Eeyaddaas. Dadkii waxay la yaabeen inamada Boqorka ee mid waliba caashaqay Eeyadda.

Haddaba markii Guhaad loo meheriyey Eeyaddii uu doonayey ee loo gurigeeyey, ayaa waxa dhacday in habeenkii u horreeyey ee ay sariir wada jiifsadaan in ay Eeyaddii ka qaniintay Guhaad gacan. dabadeedna uu dhiiggii iska taagi waayey, ka bacdina halkaas ku geeriyooday.

Berigaas ka bacdi ayaa la mamnuucay in qofna guursado Eey ama Eeyad



## CALI CADDAALAD

Cali wuxuu ahaa nin aad u faqiir ahaa oo ku ag noolaa tuulo la odhan jirey Weji-Xun. Wuu soo godnaa, weyd buu ahaa, tafeeno yaraa. Inkastoo aaney da'diisu weyneyn, haddana waxa dul ahaan la moodi jirey oday. Qurux waa u dhashay, hase yeeshee, gaajo, macaluul iyo darxumo ayaa ka soo reebtay lafo yaryar oo dhuudhuuban. Wuxuu qabay haweenay miskiinad ah oo la odhan jirey Ijo; wax ubad ahna isuma lahayn. Ijo waxay ahayd afo aad u karti iyo samir badneyd oo aan u jixinjixin jirey dhibaato kasta iyo waayaha adduun toona. Iyada laf teedu caato ayey ahayd, hase ahaatee, way yara dhaantay Cali. Cali wuxuu lahaa naanaysyo fara badan: dadka qaar waxay ugu yeedhi jireen Cali Xaaboole, qaarna Cali caddaalad, waayo wuxuu hal-qabsi u lahaan jirey, «ma waxaas baa caddaalad ah». Naanaystan dambe ayaa badanaaba loo yiqiin.

Cali wax xoolo ah wuxuu lahaa Dameer uu ku guri jirey xaabada. Maalin walba xaabada uu guro wuxuu ka heli jirey lacag aan ka badan jirin ama ka yaraan jirin lix gambo (lix kuumi). Lixdaas gambo wuxuu u qaybin jirey sidatan: afar gambo wuxuu masruuf u siin jirey Ijo, hal gambo iyo beysteenna wuxuu ku gadan jirey garaabo uu ku qayili jirey habeenkii; beysteenka soo hadhayna wuxuu ku iibsan jirey buuri. Irsaaqadda soo geli jirtey Cali waxay u qaybsanayd sidaas. Dhowr jeer ayey Cali iyo Ijo isku-qabteen lacagta uu Cali ku gato garaabada (jaadka). Ijo waxay ku andicoon jirtey in aan loo baahnayn lacagtaas sida micno-darrada ah loogu cunaayo caleen aan wax faa'iido ah lahayn muddarro mooyaanee. Calise wuxuu ku doodi jirey in uu jaadku galay dhiiggiisa oo uusan noolaan karin la'aantiisa. Wuxuu kaloo Ijo u sheegi jirey in haddii uusan cunin ama qayilin uu cunaa-

yo DUBAAB, sidaas daraadeedna uusan seexan karin. Wuxuu kaloo jaadka ku sheegi jirey in uu yahay quutal awliyaa.

Markii uu cunaayo garaabada ee uu murqaasan yahay, Cali aad ayuu uga fekeri jirey saboolnimadiisa, wuxuuna qorsheyn jirey tallaabooyin la xidhiidha xalliladda noloshiisa adag, kuwaasoo aanu weligii hirgelin, sababtoo ah, wuxuu arkay in uu qorshe murqaan noqonaayo dhallanteed marka ay runi timaado. Cali wuu gabyi jirey ama heesi jirey mararka qaarkood ee uu aad murqaamo. Tixdan wuxuu ka tiriyey qorshooyinkaas u hirgelin waayey, wuxuuna yidhi:

**Marka aan murqaamaba, mowshaan baan maanka saaraaye**

**Maab maafishuu ii dhisaa, faaruqoo madhane**

**Hawadaas waxaan la meeraba, markaan muunka sare joog**

**Murankii naftaydaan maqlaa, miyirna mooyaanee.**

Cali wuxuu ku noolaado noloshaas adagba, berigii dambe ayaa waxa arligii ka dhacday abaar caan ahayd oo la dhan jirey GAATAMA, taasoo dadkii iyo duunyadiiba gabaabsiday. Dameerkii Calina waxyeello aan yarayn baa ka soo gaadhay abaartaas, waayo wuu weydoobay, taagdarreeyey oo socodgabay, sidaas daraadeedna, wax ba wuu qaadi kari waayey.

Maalin maalmaha ka mid ah ayuu Dameerkii u dhaqaaqi waayey Cali. Asagii oo ag taagan oo garan la' wax uu sameeyo, ayaa waxaa soo martay habar khudrad xanbaarsan, indhihiisii markiiba waxay ku dhacayn basbaas, isla markiiba fikrad ayaa maskaxdiisa ku dhalatay.



«Eeyaa, billaa caleyk i sii xabbad basbaasa,» Cali baa baryey islaantii. Iyadoo yaaban ayey xabbad u soo tuurtay. Basbaaskii ayuu Cali qaaday oo dameerkii dabada ka mariyey: isla markiiba ayaa inta uu ciyey orod isasii daayey. Calina waa ka daba orday oo gaadhi waayey. Markuu arkay in uu dameerkii ka jiitay, ayuu asna dabada iska mariyey basbaaskii. Asagoo cabaadaya ayuu markiiba soo gaadhay oo dameerkii dibka qabsaday. Cali iyo dameerkii oo samadaa maraaya ayaa soo ag maray haweynadiisii oo hor taagan gurigii. Sida caadada u ahayd, Cali maalin walba marka uu xaabada ku soo raro dameerka, wuxuu soo mari jirey haweynadiisa oo u raaci jirtey suuqa si ay xaabada ula gaddo. Haweynadii Cali aad ayey ula tacajebtey orodka ay dhigayaan Cali iyo dameerkii, waayo awel iyagoo luudaaya ayey maalin walba soo mari jireen, maantase waa ka gaar. Haweynadii, halkii ay ka eegeysey inay Cali iyo dameerku isu taagaan oo ay raacdo, ayey mar qudha xuf ku dhaafeen. Haddaba Cali baa arkay haweynadiisii oo weli ku hor sugeysa gurigii, markaasuu u qayliyey oo ku yidhi, «Naa .. hooy ... naa adna naga soo daba basbaasayso».

Bal malee weyd ararty! Markii ay tuuladii Weji Xun ku soo dhowaayeen, ayuu dameerkii turunturooday oo afka dhulka geliyey. Gac! halkaas buu qoorta kaga jabay, dabadeedna ku geeriyooday. Cali qudhiisu wuu ka daba kufay dameerka, laakiinse xagtimo iyo suxulada oo mudhxay mooyaanee waxyeello culusi ma gaadhin. Naxdintii buu isla markiiba kacay oo is dul taagay dameerkii oo rafanaaya, isagoo ku celcelinaaya, «Alla gacantay go'day!». Isla markaasna ilmo ayaa ku soo joogsatay indhihiisii oo in uu ooyo ku sigtay. Cadho iyo ciil illayn looma dhinto! Muxuu qaban karaa! Dameerkii oo meyd ah ayuu kolba gees ka maraa oo dhinac u rogaa - balaq! balaq! Waabu rumeyn waayey in uu dhintay! Tolow ma bakhti baa? Midhaa waa suuxsan yahay ? Bal hadda yara sug

waa intaasoo uu soo miiraabaaye! Markii xaabada ayuu ka rogay. Hal cabbaar ahna markii uu sugaayey ayuu aad u fiirsaday oo arkay in uu bakhti yahay. Asagoo isku buuqsan oo calaacalaayaa ayey Ijona soo gaadhay. «Waar maxaa dhacay», markii ay dhowr jeer ku celcelisay ee uu u jawaabi waayey, ayey iyana fiirisay dameerkii oo aragtay in uu bakhti yahay.

«Waar haddii dameerkii dhintay, maxaad meesha la taagan tahay ee aad ka qabaneysaa? Nacasnimo weeyaan waxyaabaha qaarkood, e ina keen oo xaabada badhkaaga soo qaad», Ijo ayaa si cadho ah ugu tidhi Cali.

Halkaas bay ka tukubeen iyagoo muraaradillaacsan oo midba xidhmo xaabo ah tuurta ku sido.

Markii xaabadii la iibiyey ee gurigii laysugu soo hoyday fiidkii ayey Ijo ku tidhi Cali «Waar mar haddii uu dhintay dameerkii qudha ahaa ee aynnu ku adeegan jirney, laga bilaabo caawa waa in aynnu labadeennu kaalintiisii galnaa oo maalin walba inta ay kacno salaadii aynnu soo gurnaa xaabada, illayn dawersan maynno e».

«Waa hagaag», ayuu Calina ugu jawaab celiyey.

Markii uu muddo Cali jarmaaday ee uu habeen walba soo hoyday isagoo meel waliba jidhkiisa ay damqanayso, ayaa waxa niyaddiisa gashay tabcaanimo iyo caajisnimo. Berigii dambe oo dhan dirqi ayey Ijo ku toosin jirtey Cali. Subax-subax buu diidi jirey oo odhan jirey, «Naa i daa xaabo aan doonayaa ma jirto e». Marka ay ka tagto, ayuu asna mar dambe ka daba tegi jirey.

Ilaa intii uu dameerkii ka dhintay, Cali waxa galay werwer iyo walaac fara badan. Habeennada qaarkoodna ma ga'mi jirinba ama wuxuu ga'mi jirey oo keliya waa-



beriga. Wuxuu muddo sidaas ahaadaba, habeenkii dambe ayuu saqdii dhexe hurdadii ka hambaabiray, dib dambena u ga'mi waayey, markaasuu heestan tiriyey:

**Juubaha aroortii, anigoo jarmaado ah**
**Waxaan bahalo jiifiyo, jilbis uga dulboodaa**
**Waa juuca gaajada, jirribaad adduunkee**
**Godob aan hadhayniyo, gashi uma galgalatide**
**Nafyey gama' diiday, waxa kula gudboon garo.**

* * *

**Jaahwareer jibaadkii anigoo jal'aafe ah**
**Wuxuu jidhif sideedii, dubku ii jajabayaa**
**Waa juuca gaajada, jirribaad adduunkee**
**Godob aan hadhayniyo, gashi uma galgalatide**
**Nafyey gama' diidaay, waxa kula gudboon garo.**

* * *

**Waxa jidhay jidhkaygii, anigoon jirroonayn**
**Jidiinkayga jiidee, jaahaygii kala dilay**
**Waa juuca gaajada, jirribaad adduunkee**
**Godob aan hadhayniyo, gashi uma galgalatide**
**Nafyey gama' diidaay, waxa kula gudboon garo.**

Habeenkaas intiisii dambe oo dhan waxa maskaxdiisa isaga soo daba dhacaayey fikrado fara badan. «Waa kuu nacasnimo in aad weligaa ku noolaato silic iyo saboolnimo», Cali baa isugu sheekeeyey, «ma ciil iyo caydh baad weligaa ku jiri! Maya ... maya.. Waa kuu doqonnimo iyo dullanimo in aad sidatan ku dhammeysataa cimrigaaga! Kollay mar baad dhimanaysaa e maad imminka dhimantid! Oo sidaad u dhiman?» Aakhirkiina wuxuu ku goostay in uu is dilo markii uu waagu beryo. Subaxnimadii markii ay Ijo istidhi toosi Cali, wuu diiday, dabadeedna way ka tagtay. Barqadii ayuu Cali hurdadii ka toosay, isla markiina socod ayuu bilaabay isaga oon garanahayn gees

uu u jeedo ama jiho uu ku aadan yahay toona. Hal cabbaar markii uu aaydii dhex-soconaayey ayuu qaylo maqlay. Markii uu fiiriyey xaggii qayladu kaga timid oo ahayd dhinaca bidixda, wuxuu arkay buur aad iyo aad u dheer oo qiyaastii u jirta ilaa dhowr kiilomitir. Intii uu ku noolaa tuulada Weji-Xun oo dhan ma arag buurtaas. «Tolow maxay ahayd buurtani?» ayuu hoos isu weydiiyey, dabadeedna cagahiisa ayuu wax ka deyey illaa uu buurtii hoos tegey. Cali baa buurtii sare u eegay oo arkay dhagaxaanta waaweyn ee hareeraheeda saarsaaran iyo dhadhaabaha ay ka soo taagan yihiin falliidho fiiqfiiqani. «Oo maad tan iska soo tuurtid». Cali baa isyidhi. Isla markiiba si degdeg ah ayuu buurtii u koray, markii uu gaadhay fiiqii u sarreeyeyna, wuxuu hoos u soo fiiriyey dhulkii; wuxuuna arkay jararka, dawyada, boholaha, iwm oo argagaxiso leh oo afka sidaas ugu soo kala haya. «Waa kuu nacasnimo Caliyow in aad geerida ka baqdaa», Cali baa naftiisii la hadlay, «maalin uun baad dhimanaysaa e maanta dhimo». Erayadaas isagoo leh ayuu inta uu indhaha isku qabtay jarkii iska soo tuuray. Muddo ka bacdi ayuu toosay oo is arkay isagoo jiifa meel bannaan. Asagoo rumeysan in uu dhintay meesha uu joogana tahay AAKHIRO, ayuu hareerihiisii eegeegay, wuxuuna arkay, kaymo iyo buur dheer. Buurtii ayuu aad ugu fiirsaday isagoo yaaban. «Tolow ma buurtiibaa? Ma mid u eg oo Aakhiro ku taal baa?». Indhihiisu waxay qabteen meeshii uu ka koray iyo xitaa fiiqii uu iska soo tuuraybe. «Waar ma aniga ayaa waallan mise Cadan baa laga heesayaa! Waa yaab!» Halkaas ayuu Cali ku xaqiiqsaday inuusan dhiman meesha uu joogaana ahayn Aakhiro. Wuxuu aad ula yaabay sida aaney waxba u gaadhin maadaama meesha uu iska soo tuuray ama riday ahayd meel aad u khatar ah oo waxa ka soo dhacaa aanu noolaan karinba. Arrintu si kasta ha u dhacdee, Cali xarriijin yarina ma gaadhin.

Cali isagoo aad u cadhaysan oo ka xun wuxuu u



dhiman waayey, ayuu meeshii ka dhaqaaqay oo iska socday uun isagoo aan garanahayn meel uu u socdo. Wuxuu socdoba, goor galab ah ayuu yimid Baddii. «Haa oo maan baddaba isku qariyo». Dabeeto baddii ayuu iska dhexqaaday. Waa yaab! Baddiiba waxay Cali u dhaafi weydey canqawyada inkastoo uu socday dhowr kiilomitir. Xitaa wuxuu isku deyey in uu jiifsado si ay biyuhu u soo gaadhaan madaxiisa, hase ahaatee, biyihii way qarinba waayeen oo hoos uun bay u gudhaan. Isagoo naftiisa hiifaya oo garan la' wax alla wuxuu suubiyo, ayuu baddii ka soo baxay. Dabadeed, xeebtii badda ayuu iska qaaday uun. Wuxuu ku soo baxay nin meyd ah oo middiyi ka taagan tahay laabta. Inta uu middidii oo dhiig leh ka gooyey meydkii ayuu qaatay. Markii uu laba kiilomitir ka socday meeshii, ayuu dib u soo jeleecay, wuxuuna arkay rag fardo ku jooga oo ku dhow ninkii meydka ahaa. Cali orod ayuu cagta soo rogey, wuxuuna u yimid raggii oo meydkii dul taagan.

«Waar yaadha, aniga ayaa dilay ninkan, waxaan laabta kaga dhuftay middidan», Cali baa yidhi, isagoo weliba tusaaya middidii dhiigga lahayd.

Nimankaas oo ahaa Askar raacdeyneysey qofka meydka ah oo ahaa nin la soo qafaashay, waxay la tacajebeen ninkan (cali) sida cad ee badheedhka ah u qiranaaya dembigiisa.

«Oo maxaad u dishey», Askartii baa Cali weydiisay.

Baga. Aniga ayaa dilay», ayuu Calina ugu jawaabay.

Halkaas ayey Askartii ka soo kaxaysay Cali oo labada gacmood haad-biidhi (Handcuffs) kaga jabsan yahay. Waxaanay u keeneen Boqorkoodii.

Sarreeye, ninkan ayaannu wadnaa». Askartii baa Boqorkii u sheegtay, «wuxuuna noo qirtay in uu dilay ninkii la afduubay habeen hore; wuxuuna noo sheegay in uu ku dilay middidan dhiigga leh oo aannu gacantiisa ka qaadnay».

«Kurta ha laga gooyo asna», Boqorkiibaa amar ku bixiyey.

Ka bacdina, Cali waxaa loo waday guriga lagu qisaaso ama lagu dilo gacan-ku-dhiiglayaasha. Intii jidka la sii waday ayuu naftiisa ugu sheekeeyey, «Haa.. markii aad buurta iska soo tuurtay waa adigii dhiman waayey e, maanta ayaa dhimanaysaa». Ninka qoorta-gooya oo ahaa addoon muruq weyn markii Cali loo geeyey ayuu asna u taxaabay qorigii madax-goynta, isaga oo intii ay jidka sii socdeen la sii dabagalay faash weyn oo afeysan. Markii la gaadhay meeshii, ayaa Cali lagu amray in uu jilba-joogsado oo qoorta saaro qoriga madax-goynta. Markii uu sidaas yeelay, ayuu addoonkii faashkii ku qabsaday labada gacmood oo si lixaad leh ugu dhuftay kurtii Cali. Baf! Faashkii baa kala jabay oo Cali waxba ma yeellin - xitaa xarriijin yar. Faash kale ayaa la dalbay. kaasina waa kala jabay sida kii hore oo kale. Faash saddexaad ayaa la keenay, asna dhexda ayuu balow ka kala yidhi. Qoorgooyihii iyo dadkii daawanaayeyba waxay gacmaha saareen dhabannada. Arrintaas dhacday markii Boqorka loo sheegay, wuxuu yidhi. «Qof aanu Ilaahayn doonahayn in uu dilo, dili meynno ee siidaaya». Halkaas baa Cali lagu fasaxay oo la yidhi, «xor baa tahay e, irridda dhaaf». Hase yeeshee, Cali siideyntaas aad ayuu uga xumaaday. Isla markii la siidaayeyba wuxuu bilaabay socod isaga oon garanahayn waxuu sameeyo ama meel uu qabto.

Cali wuxuu iska socdaba wuxuu yimid magaalo weyn, wuxuuna isagoo daawanaaya ku soo baxay guri



weyn oo ay illaalinayaan Askar fara badan iyo Eey dadcuni ihi. Cali wuu iska galay gurigii isagoo rabey in la dilo, hase yeeshee, ma ay dareemin Askartii iyo Eey toona. Gurigii weynaa ayuu gudaha u galay, wuxuuna qol dhexe ugu tegey Boqor iyo xaaskiisii ooy la joogaan rag kale oo La-taliyayaashiisa ihi.

«Waar maxaad ahayd? Halkee baadse soo martay?» markii la su'aalay Cali, wuxuu ku jawaabay, «Ninkaa aad aragtiin baan ahay, waxaanan ka soo galay irridda ay joogaan Askarta iyo Eeydu». Aad bay Boqorkii iyo La-taliyayaashiisiiba ula tacajabeen sida uu Cali ku soo dhaafay albaabka hore isaga oo aaney arag Askartii iyo Eeydii toona. Markii Boqorkii weydiiyey Askarta sababta ay u soo daayeen Cali ama ay u arki waayeen markii uu irridda hore soo maraayey, waxay sheegeen in aaney kaba warqabin cid soo dhaaftay iyaga oo aan ogeyn.

«Orod oo noqon oo inta aad irridda ka baxdid, haddana nagu soo laabo», ayuu Boqorkii ku yidhi Cali.

Sidii oo kale ayuu Cali isaga oon cidna dan ka lahayn albaabkii ka sii baxay oo haddana ku soo laabtay Boqorkii.

«Nin amran baa tahay», Boqorkii oo yaaban baa yidhi, «maanta laga bilaabo waxaad ka mid noqoneysaa La-taliyayaashaydа, inantaydaasna waan kuu guurinayaa».

Halkaas ayaa Cali loogu guuriyey inantii ina Boqor oo uu dabadeed noqday nin magac, siqad iyo kalsooni ku leh dhinaca Boqorka. Cali wuxuu kaloo noqday nin door weyn ka ciyaara arrimaha diinta iyo garsoorka, sidaas daraadeed, waxaa lagu magacaabi jirey CALI CADDAALAD, magacaasoo ahaa kii loo yiqiin markuu ahaa Xaaboolaha.

Muddo markii uu ahaa La-taliye oo uu dhadhamiyey nicmada. raaxada iyo macaanka ay noloshu leedahay. ayaa maalin maalmaha ka mid ah, isagoo fadhiya berendhaha gurigiisa goor galaba, waxa u yimid Malakal Mawtkii oo ku yidhi. «Waxaan ahay Malakal Mawtkii, waxaana la ii soo diray inaan kaa qaado nafta».

Cali oo dhinacna ka baqaayey, dhinacna ka cadhaysan baa ugu jawaabay. «Intaad imminka socotid, xaggaad jirtey markii aan buurta iska soo tuuray ? Xaggaad jirtey markii aan is idhi Badda isku qarqi ? Xaggaad jirtey markii saddexda faash kurtayda ku jabeen? Xaggaad jirtey markii aan Askarta iyo Eeyda dad-cunka ah kolba dhinac u dhaafaayey?»

«Wakhtiyadaas oo dhan». Malagii baa ugu jawaabay, «waxaan dhammaanin saacadihii aad joogi lahayd adduunka. Galabtase wey dhammaatay».

«Wax keliya ayaan codsanayaa ee maad iga aqbali». Cali baa weydiistay Malagii.

«Haa... dabcan». ayaa Malagii markiiba ugu jawaabay Cali.

«Waxaan kaa codsanayaa», Cali baa weydiistay. «in aanad i dilin illaa aan ka tukanaayo».

«Waa tahay».

Marxaladdaas ayuu Cali ku joojiyey tukashadii, waayo wuxuu ka baqday inuu Malagu nafta ka qaado haddii uu Salaad qudha tukado. Laakiinse, nasiibdarro Cali wakhti dheer ma sii raaxaysan. Maalintaas uu Malagu u yimid afar cesho ka bacdi, ayaa waxa dhintay mu'adinkii Masaajidka weyn ee Xaashiyadda Boqorka, dabadeed Boqorka oo ogaa in uu Cali diinta aad ugu wanaagsanaa ayaa isla markiiba ku magacaabay inuu jagadii mu'adinnimada qabsado. Cali oo og in uu dhimanaayo haddii uu tukado ayaa cirka iyo dhulkuba la wareegeen oo garan waayey wax uu suubiyo. Xag kastaaba u daran: Boqorka ma diidi karo waayo wuxuu noqonayaa nin diintii dafiray oo aan Ilaahba aqoosanayn. sidaas awgeedna dembigiisu waa dil. Midda kale haddii uu aqbalo amarka Boqorka oo uu noqdo mu'adin. waxa yaqiin ah oo uu hubaa in ay naftu ka baxayso marka u horreysa ee uu salaad foodda saaro. Cali talo wey ku caddaatay. Ugu dambeyntii, wuxuu goostay in uu diido amarka Boqorka wax kastaaba ha dhaceene. Markii Boqorkii loo sheegay amardiidadii Cali, wuxuu u yeedhay toban Askar, wuxuuna amar buuxa ku siiyey in ay inta ay Cali qaadaan dhexgeeyaan masaajidka oo aaney u oggolaan in uu mar qudha ka soo baxo illaa uu dadka tujiyo. Isla markiiba. Askartii sidii bay yeeshay oo Cali bay masaajidkii dhexdhigeen. Cali oo naxsan ayaa hareerihiisii fiirfiiriyey - intuusan wax kaleba suubin buu Malagii isa soo dul taagay oo yidhi. «Iska warran, Caliyow».

«Waa nabad». Cali oo gariiraaya, wadnahuna baqdin boodboodaayo baa ugu jawaabay.

«Ballanteennu waa tii ahayd in aan nafta kaa qaado markii aad tukato». Malagii baa yidhi, «imminkana, degdeg u tuko. wakhti dambe ha iska lumin e, maanta lagaa tegi maayo e».

Halkaas baa miskiinkii Cali naftii lagaga qaaday ka dib markii uu salaadii tukaday.

Beri waxa jirey Boqortooyo yar oo la odhan jirey Hawaara, waxaana ka talin jirey boqor la odhan jirey Sugulle. Boqor Sugulle wuxuu ahaa nin geesi ah oo aftahamo ah, wuxuuna ka yimid reer sabool ah oo beeraley ah. Xoog ayuu ku helay boqornimada, wuxuuna afgenbiyey Suldaan Manaxariiste oo asagu seef ku xukumi jirey dadka.

Boqortooyadaasi waxay lahayd oo keliya nin dhakhtar ah oo la odhan jirey Diktoor Uutaax. Asaga keligii ayaa daweyn jirey dadka, xitaa ma lahayn Kaaliye. Maalintii dambe ayuu Diktoor Uutaax geeriyooday ka dib markii uu wadnuhu istaagay. Uutaax markii la aasay ka dib ayey Faadumo Boqor ku mergatey cad ay cuneysey, markaas baa loo baahday dhakhtar. Magaalamadaxdii Hawaara ayaa laga yaboohiyey dhakhtar, markaasaa cidna laga waayey. Dabadeed Boqor Sugulle ayaa amar degdeg ah ku bixiyey in la raadiyo dhakhtar daweeya Faadumo. Askar fardo fuushan baa meel walba ama jiho kasta loo diray si ay u raadiyaan qof dhakhtar ah.

Hurin Askar ah oo uu watey Xiddigle Madaxduub ayaa ku soo baxay qof dumar ah oo hortaagan gurigeedii. Haweynadan waxa qabay nin la odhan jirey Samatar oo ahaa nin aad u kulul oo had iyo jeer tumi jirey, oo xitaa markaas ay Askartu la kulantay wey ooyeysey oo wuxuu budh la dhacay daqiiqado ka hor. Haddaba, markii ay askartu weydiisay in ay taqaan cid dhakhtar ah ayey, si ay uga aargoosato Samatar, u sheegtay in ninkeedu (samatar) yahay dhakhtar aad u fiican oo dadka reer miyiga ah oo dhan daweeya, waxayse raacisay, «Waa nin aad u madax adag oo aan cidna wax ka maqlin».

«Oo mee? Xaggee buu joogaa?» Askartii baa su'aashay.



«Waa ka beertaas dhexjooga», Geello ayaa u tilmaantay.

Ka bacdi Askartii baa si degdeg ah ugu tagtay Samatar oo beertiisii ka celinaaya shimbirta.

«Waar yaa waa ninka, sow dhakhtar ma ihid? Ina keen», Xadhigle Madaxduub ayaa si degdegsan u yidhi inta uu ka degey faraskii.

«Waar anigu ma ihi dhakhtar, idinna raaci maayo», Samatar baa ugu jawaabay.

«Ma rabno in wakhti si maalaayacni ah nooga lumo, waayo arrintu waa degdeg. Faadumo Boqor ayaa mergatay oo nolosheedu halis ku jirtaa ee soo fuul faraskan», Madaxduub ayaa si cadho ah ugu yidhi.

«Anigu haddii aanan ahayn dhakhtar, maxaan u qaban karaa Faadumo Boqor?» Samatar oo yaaban baa yidhi.

«Waar yaadha waa nin madax adag ee soo qabta oo ku xidhxidha faraskan», Madaxduub ayaa Askartiisii amar ku siiyey.

Halkaas baa Samatar lagu qabtay oo inta faras lagu xidhxidhay weliba cabbaar la tumay.

Markii Boqor Sugulle la horgeeyey, ayuu Samatar hadalkii hororsaday oo yidhi, «Mudanow, anigu ma ihi dhakhtar, mana noqon, weligayna wax ma daweyn, xitaa ma arag ruux la daweynaayo. Haddaba sidee baan u daweyn karaa inantaada?»

Boqorkii oo aan hadlin buu Madaxduub halkan ka soo booday oo yidhi, «Sarreeye ninkani waa dhakhtar

caan ah, hase yeeshee, waxaa naloo sheegay in uu yahay nin aad u macangeg ah oon waxba cidna ka maqlin».

«Haddii uu diido in uu daweeyo inanta, kurta ha laga gooyo, asna», Boqorkii baa amar ku bixiyey.

Samatar oo yaaban oo garan la' wax uu sameeyo ayaa la soo taxaabay oo la horkeenay Faadumo Boqor.

«Aniga iyo Faadumo mooyaane dhammaan intiina kale, naga baxa», Samatar baa yidhi. Markii dibedda looga wada dareeray, ayuu Samatar inta uu albaabkii hoosta ka xidhay kolba gabadhii gees ka maraa. Mar wuu kadaloobsadaa, mar fadhiistaa, mar beerka dhigaa, marna gurguurtaa, isagoo mar kastaba si argigixiso leh u fiirinaaya Faadumo. Hal cabbaar ah markii uu Samatar siyaabahaas suubiyey ayuu markii dambe isyidhi kadaloobso markaasuu si lama filaan ah afka u dhacay. Waaa ... Faadumo ayaa qosol oodda ka qaadday, halkaas baanu kaga soo dhacay cadkii dhuunta taagnaa. Samatar baa albaabkii furay, dadkiina way soo galeen oo arkeen cadkii ka soo dhacay Faadumo. Waxaa aad loogu hambalyeeyey oo loogu riyaaqay sida uu Samatar u badbaadiyey noloshii inanta. Markii warkaas la gaadhsiiyey ayuu Boqor Sugulle amar ku bixiyey in guri iyo wixii uu doonaba la siiyo Dhakhtar Samatar. Hase yeeshee, Samatar baa wax walba diiday oo codsaday in la tuso Boqorka. Ka bacdi markii loo geeyey Boqorkii, ayuu Samatar yidhi, «Sarreeye, wax keliya ayaan codsanayaa. Waxaan doonayaa in aan ku noqdo reerkaygii. Anigu waxaan ahay nin beeraley ah oo aan aqoon lahayn. Waxaan aqaanaa oo keliya sida loo falo ama loo qodo Beerta».

«Maya ... Maya ... Waa ku sidee Samatar? Dhakhtar kale oo dalka joogaa ma jiro, adiga mooyee!», Boqorkii baa ugu jawaabay, «Sidaas darteed, laguma siideyn karo



waayo waan lagaa maarmahayn. Halkan ayaad nagula noolaaneysaa, wixii aad rabtana lagugu siinayaa».

Cudurdaar kasta iyo baryo kasta uu sameeyey Samatar waa laga aqbali waayey. Waxa Samatar dhakafaar ku noqotay dhakhtarnimo aanu cilmi iyo aqoon toona u lahayn ku shaqee oo ummad dhan ku dawee! Meel baa diye ah ayuu ku dhashay oo ku koray oo ku barbaaray. Beri uu yaraa ayuu weligii xanuunsaday, markaasna waxa laga gubey labada naas hoostooda iyo feedhaha dushooda, weligiisna dawo aan dabkaas ahayn ma arag. «Tolow, haddii aan qof walba ka gubo meeshii uu i yidhaahdo waa i xanuuneysaa maxay noqon? Maya .... Maya .... taasi waa nacasnimo», Samatar baa mar ku fekeray. «Waar tasho cidi kaa neefin meyso e».

Durbadii waxa la shaaciyey in dhakhtar cusub la helay, waxaana la faafiyey in qofkii xanuun hayaa uu u yimaado dhakhtarkaas cusub. Sidaas daraadeed, dad badan oo aad u bukey oo ay xitaa ku jiraan kuwo uu Diktoor Uutaaxba dawadoodii ka quustay, ayaa isa soo dhoobay xaruntii Boqortooyada. Samatar bey talo ku ciirty. Waxay noqotay in uu dadkaas ku daweeyo bilkhasab si uu naftiisa u badbaadiyo. Wuu fekeray. Wuxuu u tegey Boqor Sugulle, wuxuuna ka codsaday in loo dhiso daar weyn oo leh laba kadin: mid laga galo iyo mid laga baxo. Wuxuu kaloo codsaday in loo keeno xaabo aad u fara badan.

Muddo ku siman toddobaad ayaa daartii lagu dhisay, xaabadiina lagu keenay. Dhakhtar Samatar ayaa shaqadii bilaabay. Dab ayuu ka dhex-shiday daartii. Dadkii buu u sheegay in ay saf dheer soo qabsadaan oo sida ay u kala daran yihiin u soo kala horreeyaan. Boqollaal qof ayaa safkaas soo galay. Qaylada iyo buuqa ka dhacaaya lama malayn karo. Inta ku dirireysa «Aniga ayaa

kaa soo horreeyey ama kaa darran», waxa laga maqli karaayey meelo fog.

«Ha la fadhiisto, nidaamkana ha la dhawro; mid-midna ha la iigu soo galo». Dhakhtar Samatar baa sare ugu yidhi buuqii.

Qofkii u soo galaba, wuxuu Samatar ku yidhaah-daa uun hadalkan: «Waar dhegeyso. Laba hal kala dooro. In aan ku idhaahdo waxaad qabtaa cudur khatara oon la daweny karin, sidaas darteedna aan amar ku bixiyo in lagu gubo adiga oo nool, dhamacdaasna lagugu rido, ani-goo gubistaadaas saldhig uga dhigaaya in aanu cudur ku faafin mujtamaca; iyo in marka aad iga baxdid tidhaah-did, «dhakhtarku wuxuu i siiyey dawo oo waan bogsaday». Markaas sidaas awgeed, qofkii ka baxaaba wuxuu baqdin ku odhanaayey, «waan bogsaday oo dhakhtarka ayaa i siiyey dawo».

Muddo markii uu dhakhtar Samatar sidaas ku wa-day hawshiisii dhakhtarnimada, ayaa waxaa maalintii dambe dhacday in uu Boqor Sugulle xanuunsaday. Caloo-sha ayaa aad looga qabtay, sidaas daraadeedna waxaa si degdeg ah loogu la soo cararay oo loogu soo qaaday xa-runtii Samatar uu dadka ku daweynaayey! Boqorkii oo la sido oo taaha ka dhacaaya la moodo aar la ganay, ayaa loo soo daf-siiyey. «Waar bal dhiga», Samatar baa yidhi isagoo naxsan. Boqorkii baa la dhigay dhulka, markaasuu galgashay oo kolba dhinac isu tuuray ... aa ... aa ... Sama-tar baa dadkii u saaray dibedda. Markii asaga iyo Boqor-kii isku soo hadheen ayuu ku yidhi, «Sarreeye, i dhegeyso. Cudurkaagu maaha mid qayral caadi ah ee waa mid aan ka daweeyey dad badan. Fiiri, dhamacdaas ayaan ku yara dul dhigayaa, ka bacdina adigoo bogsaday ayaan kaa soo saarayaa».



Boqorkii baa dabkii eegay oo xanuunkiiba ka ba'ay. Inta uu naxay oo fajacay oo illaawey xumaddii haysey ayuu yidhi, «Maya ... Maya .. miyaad i dileysaa? Sidee baan dabkaas ugu dhex noolaan karayaa? Waar nacas ma ihi oo dabkaas dhex geli maayo e, dawo kale ma ii haysaa?».

«Sarreeye, maaha sidaad mooday, micno ma leh. Dad badan baa muddo ku jirey oo ka soo baxay iyaga oon xitaa meel yarina xanuunahayn». Samatar baa u sheegay Boqor Sugulle. Isla markiiba, si uu hadalkaas ugu xaqii-jiyo Boqorka, ayuu inta uu baxay u yeedhay bukaan so-codkiisa kii ugu dambeeyey.

Gacanta ayuu soo qabtay oo hor keenay Boqor Sugulle oo yidhi, «Sarreeye, fiiri ninkan. Shan daqiiqo ayuu ku dhex jirey dhamacdan. Miyuu meel qudha nabar kaga yaal?».

«Waar, ma dhabbaa?». Boqor Sugulle oo naxdintii bogsaday baa weydiiyey ninkii.

«Haa», ayuu ninkii ugu jawaabay.

«Suuragal ma aha!» Boqorkii baa yidhi.

«Mudane, waa suuragal, maadaama aad tidhaah-deen Samatar baa dhakhtar ahba», ninkii baa yidhi.

«Waar, iska bax!» Dhakhtar Samatar baa dibedda u saaray ninkii. Ka bacdi, Samatar ayaa ku soo jeestay Boqorkii oo ku yidhi, «Sarreeye, i dhegeyso waxaan kuu sheegayaa runta e. Sida aaney suuragal u ahayn in qofna ku dhex noolaan karo dabkaas ayaaney suuragal u noqo-nahayn in uu nin jaahil ihi daweeyo dad buka. Anigu ma ihi dhakhtar, wax badan baan idiin sheegay, hase yee-

shee, dheg baxdaan jalaq ii siin. Bilkhasab ku noqo dhakhtar ayaad i tidhaahdeen, taasoo igu noqotay ammakaag iyo yaab iyo ka fajaciso. Wax aan sameeyo iyo si aan wax idiinka dhaadhiciyo toona waan garan waayey, waxaanay igu keliftay in aan sameeyo wax aanan weligay sameeyeen. Waxaan doorbiday in aan qofkii ii soo galaba ku idhaahdo 'kala dooro in aan dabkan kugu rido iyo in aad tidhaahdo waan dawoobay'. Markaasna uu qof waliba baqdin u yidhaahdo 'waan dawaabay' isaga oon dawaba arag. Imminkana, waxaan Sarreeye kaa codsanayaa in aad i saamaxdid, isla markaasna aad ii oggolaatid in aan ku noqdo baadiyahaygii iyo beertaydii».

«Waa hagaag ... hadda laga bilaabo fasax ayaad tahay». Boqor Sugulle ayaa markiiba ugu jawaabay.

Halkaas buu Samatar oo muddo ahaa dhakhtar caan ah kaga baxay magaalomadaxdii Boqortooyada Hawaara oo aaday miyigiisii uu af yiqiin. Sii deyskaas Samatar waxaa aad uga xumaaday Geello oo ahayd xaaskiisa, waayo waxay welwel ka qabtay in Samatar sidii caadada u ahayd uu mar walba garaaci doono. Hase yeeshee, waxa dhacday in markii ay ku soo laabteen gurigoodii miyiga iyo beertoodii ay iyada iyo Samatar wada hadleen, waxaanu ugu ballanqaaday in uusan mar dambe fara saari doonin Geello .Halkaas baanay ku heshiiyeen oo ku wada noolaadeen nolol fiican.

Laakiinse, weli lagama illaawin magacii dhakhtar Samatar. Boqortooyadii Hawaara, waxaanu noqday nin had iyo jeer lagaga sheekaysto doorkii uu ciyaaray muddadii uu dhakhtarka ahaa — beeraley ilaa dhakhtar waa boodo aad u dheer.

DHAMMAAD



# FAADUMO YAR IYO CUMAR LUG-YAR

Qore
Maxamuud Maxamed Cilmi

Muqdisho 1979

## FAADUMO YAR IYO CUMAR LUG-YARE

Faadumo waxay ahayd inan yar oo fariid ah. Hooyadeed Xamdiyo iyo aabbaheed Xagaaba way jac-laayeen. Faadumo yar waxay walaalo ahaayeen wiil nacas ah oo la odhan jirey Cali Hacoo; waxaanay wada raaci jireen adhigooda.



Maalintii dambe ayuu Cali Hacoo anbaday ka dib markii ay Faadumo u dirtay in uu soo rogo riyo meel kayn ah galay. Markii ay hore u weydey ayey Faadumona ka daba tagtay. Riyihii iyo Caliba way weydey. Way daydayday oo ka quusatay. Kolba way u yeedhaa, «Waar Caliyoow!»





Faadumo way jeclayd walaalkeed Cali, mana aaney jeclayn in waxyeello gaadho. Markii ay weydeyna, waxa galay welwel iyo walaac iyo naxdin, waayo waxay moodday in uu bahal cunay. Sidii ay u baadi-goobeysey ee ay kolba kayn uga daayeysey Cali ayey Faadumona dayooday. dabadeedna ayaduna anbatay.

Sidii ay Cali u daydayeysey ayey qorraxdii dhacday. Durba dhulkii wuu madoobaaday. waayo wuxuu habeenkaasi ahaa gudcur. Cirku wuxuu lahaa daruuro, naacaw yar oo dhaxan lihina way dhacaysey. Faadumo aad bey u daashay, dabadeedna iyada oon is ogeyn bey meel dugsi ah ku dhacday. Kulkii milicda ayaa barqadii toosisay.



«Tolow meeshani maxay ahayd?», Faadumo oo weli dhalalowsan baa is weydiisay. Markaasay xasuusatay in ay walaalkeed Cali baadidoonaysey. Sare ayey ugu yeedhay, «Waar Caliyoow!». «Hooy», ayey ka maqashay meel aan kaba fogeyn. Yeedhaas bay haddana mar labaad ku celisay, markaasuu Calina u jawaabay. Midba wuxuu u soo cararay dhinacii uu ka kale qayladiisii ka maqlay. Waa laysku soo baxay oo cabbaar bay Faadumo iyo Cali is-dhundhunkadeen.

«Walaal ina keen», Faadumo ayaa tidhi. Way isa soo raaceen.





Duhurkii markii ay milicdu aad u kululaatay ayey Faadumo iyo Cali is yidhaahdeen ku nasta geed xagar ah hoostii. Markii ay fadhiisteen ayuu Cali arkay wax ka dhalaalaya geedka dhexdiisa, markaasuu mooday xabag oo ku yidhi Faadumo, «Walaalo, ii soo goo xabagtaas». Faadumo ayaa fiirisay oo aragtay in wuxu yahay il waraabe.

«Walaalle waa il waraabe ee innaga daa», Faadumo ayaa hoos ugu sheegtay Cali.




Waraabahaas oo la odhan jirey Cumar Lug-yare wuu il la'aa. Markaas isha uu Cali arkay ee uu mooday xabagta waxay ahayd ta u bedqabta ee u fayow.

«Waar ma ishayda ayaad mooddeen xabag», Cumar Lug-yare baa hadlay. «Yaryarkow dhegeysta. Candhuuf ayaan soo tufayaa saddex jeer ee kiinna ay ku dhacdo ayaan cunayaa».






Cumar lug-yare baa saddex jeer soo tufay candhuuftii oo saddexdii jeerba waxay ku dhacday Cali Hacoo, waayo ogaan buu ula eegtay; hase yeeshee, Faadumo yar ayaa mar walba inta ay candhuufta ka bi'iso Cali iyadu is marineysey. Marka uu Cumar weydiiyo, «Kiinee bey candhuuftaydii ku dhacday?», Faadumo ayaa ugu jawaabeysey «aniga».




Inta uu ka soo degey geedkii ayuu Cumar lug-yare ku yidhi Faadumo, «Inan yar oo fiican baa tahay oo ku cuni maayo ee waan ku guursanaayaa. Ina keena». Cumar iyo Faadumo iyo Cali baa isa soo raacay.






Waxay yimaadeen godkii Cumar oo ay joogaan saddex carruur ihi. Carruurtan oo ilma Cumar ihi waxay ahaayeen rajo oo waxa hooyadood la dilay habeen ay reer u dhacday.




Carruurtayda waxaad siinaysaa hilibka fiican, inankiina Calina waxaad siinaysaa dhiigga iyo uuska iyo cadaha xun», Cumar baa kula dardaarmay Faadumo.





Laakiinse Faadumo waxay inankooda maalin walba siin jirtey hilibka fiican, carruurta waraabahana dhiigga iyo uuska iyo cadaha xun. Hase yeeshee, marka ay isleedahay Cumar imaatinkiisaa soo dhow ayey Cali afka ka marin jirtey dhiig iyo uus, carruurta Cumarna dufan. Waxaaney walaalkeed u sheegtay in uusan juuq iyo jaaq toona dhihin.




Muddo markii ay ku noolaayeen godkaas iyo cidladaas ayaa waxaa maalintii dambe soo ag degey reer meel kale ka soo hayaamay.





Habeen habeennada ka mid ah ayuu Cumar u dhacay reerkaas oo lax tebis ah kala soo tegey.



Subaxdii ayuu raggii reerku soo raadiyey Cumar illaa raadkii la soo galay godkii ay ku jireen Faadumo iyo Cali iyo carruurtii waraabuhu. Sida caadada u ah waraabayaashu ma hadhsadaan godadkooda maalintii mid waliba marka uu waagu beryo ayuu ay gudh[illegible]da jaraa oo seexdaa illaa galabku ka dumaayo. Sidaas daraaddeed, Cumar kuma jirin godka markii raggu dul yimid.





Faadumo oo godkii ku jirtaa ayaa maqashay hadal dad. Mar qudha ayey dibedda u soo booday oo aragtay rag hareero tuban. Raggii qaar ka mid ah ayaa Faadumo moodey waraabihii, waxaanay ku sigteen in war mo ku boobaan, hase ahaatee qaar baa ka joojiyey oo sare ugu qayliyey, «Waar bal u kaadiya».



Faadumo oo naxdin kala qalashay ayey weydiiyeen, «Naa maxaad ahayd». Dabadeed, Faadumo oo weli firko-naxsan baa u sheegtay sheekadeedii oo dhan.

«Naa haddii aannu kaa dilno waraabaha, ma na ogoshahay oo ma na raacaysaa?» raggii baa su'aalay Faadumo.

«Alla haa!» ayey markiiba Faadumo la soo booday. Ka bacdi raggii baa ku yidhi, «Caawa fiidka markii uu idiin yimaado Cumar lug-yare, ka dhergi hilib, dabadeedna ka codso in aad hal cabbaar ah ku hor ciyaarto godka oo uu asna kuu jiibiyo. Annaguna meel dhow ayaannu ku soo gabban doonnaa. Marka aannu maqalno codkaaga ayaannu inta aannu soo sanqadhtirano idinku soo dhowaan doonnaa. Halkaas baannu ku toogan doonnaa Cumar Lug-yare. Xusuusnow, sare aad ugu hees marka aad hubsato in uu dibedda joogo, si aannu u ogaanno in arrintu diyaar tahay».





Faadumo ayaa istidhi gal godkii, markaasay irriddii hore kula kulantay carruurtii waraabaha oo sow xandhegeysanaysey! Markiiba inta ay shakiday ayey dibedda u baxday oo u qaylisay nimankii oo meel dhow sii socdey.



Markii ay u yimaadeen ayey arrintii u sheegtay. Dabadeed, waxa lagu arrinsaday in saddexda yaryar ee waraabe la dilo. Cali Hacoona la kaxeeyo; isla markaasna ay Faadumo u sheegto Cumar lug-yare in walaalkeed iyo carruurtiiba ay rag dileen. Waraabayaashii yaryaraa baa la gawracay. Calina waa la kaxeeyey






Sidii caadada u ahayd, Cumar lug-yare ayaa fiidkii yimid. Wuxu tebey carruurtii, markaasuu weydiiyey Faadumo. «Naa maye carruurtii iyo Caliba?» «Maanta ayaa la dilay oo waxa dilay niman noogu soo galay godka», Faadumo ayaa ugu jawaabtay.

«Niman maxay ah?» Cumar oo cadho iyo ciil dhulku la wareeganayo ayaa haddana su'aalay Faadumo.

«Ma garanahayn. Aniguna halkaa baan galay oo ku dhuuntay, carruurtii iyo Calina way gawgawraceen, meydkoodiina way qaateen». Faadumo ayaa u sheegtay Cumar.



Markii uu casheeyey oo cunuhu cadho jiq yahay, ayey Faadumo tidhi, «Cumarow, calool adayg waa Ilaah wehelkii. Nin baad tahay ee ha calool nuglaan. Waxa caawa inala gudboon in aynnu tacsi u dhigno. Dadkayagan bini-aadmigu waxaannu leenahay caadooyin la yaab leh. Saddex jeer oo keliya ayaannu cayaarnaa. Marka aannu haasaawayno ee aannu guurdoonka nahay waannu ciyaarnaa. Marka aannu is-oroosnana waannu ciyaarnaa. Marka uu qof naga dhinto ee aannu tacsidiisa ku jirnana waa ciyaarnaa. Bal markaas, maadaama aynnu tacsi ku jirno caawa, soo bax oo godka kadinkiisa inoo saar aan tacsi ciyaarnee!».

«Naa hoy joog, Faadumooy!» Cumar baa u digay Faadumo. «Naa raggii laayey dadkeennii yaaney innagana ina dilin oo ina soo qaylo-raacin e naa hooy joog!».

«Alla weey! Sidee baan u seexan karaa iyadoo kii aan adduunka u jeclaa la dilay? Tollaay! Ma sidaas baad Cumarow fulay u tahay?» Faadumo oo laabta garaacaysa oo iska yeelyeelaysa sidii qof murugeysan ayaa tidhi.





«Waa hagaag eh dibedda inoo saar», Cumar baa oggolaaday.

Markii ay ku hubsatay Cumar bannaankii ayey Faadumo inta ay sacabkii aad u garaacday, hees sare ugu luuqeysay si uu raggii u maqlo.





Markii ay maqleen codkii Faadumo, ayuu raggii soo dhukusay oo soo dhabbacday illaa ay dhowr tallaabo u soo jirsadeen Cumar oo u jiibinaaya Faadumo.





Dhawdhac! Xabbad baa Cumar kaga dhacday jee niga dabadiis. Asaga oo ay naftii ka sii baxayso ayuu ca laacalay oo yidhi

Imisaan lahaa naa hooy go'dooy gaabso!
Imisaan lahaa naa raggu waa gudaaye gaabso!
Imisaan lahaa naa yaan lay ganine gaabso!



Markii la toogtay Cumar lug-yare ee uu dhintay ayey Faadumo raacday nimankii; waxaana guursaday oo aroosay Geedi oo ahaa wiil geeljire ah, boqol halaadna lahaa.

